413 TAKOORKA, DHIBAATAYNTA IYO XADGUDUBKA

I. UJEEDADA

Ujeedada siyaasaddani waa in la joogteeyo bey'ad barasho iyo shaqo oo ka madhan takoor, dhibaatayn iyo xadgudub kuwaasi oo kusalaysan qowmiyad, midab, caqiido, diin, jinsiyada asalka ah jinsiyada asalka ah, jinsi, da', xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada.

II. ARAGTIDA GUUD EE SIYAASADDA

A. Siyaasadda degmo dugsiyeedku waa joogtaynta bey'ad barasho iyo shaqo oo ka madhan takoor, dhibaatayn iyo xadgudub kuwaasi oo kusalaysan qowmiyad, midab, caqiido, diin, jinsiyada asalka ah, jinsi, da', xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada. Degmo dugsiyeeddu waxay mamnuucday nooc kasta oo dhibaatayn iyo xadgudub ah oo kusalaysan qowmiyad, midab, caqiido, diin, jinsiyada asalka ah, jinsi, da', xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada.

B. Xadgudubka siyaasaddan wuxuu yimaadda marka arday, macallin, maamule, ama hawlwadeen kale oo degmo dugsiyeedka ka tirsan uu dhibaateeyo arday, macallin, maamule, ama hawlwadeen kale oo degmo dugsiyeedka ka tirsan ama koox ah arday, macallimiin, maamulayaal, ama hawlwadeeno kale oo ka tirsan degmo dugsiyeedka iyagoo adeegsanaya ficil ama xidhiidh kusalaysan qowmiyadda, midabka, caqiidada, diinta, jinsiyada asalka ah, jinsiga, da'da, xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada qofka, sida ku cad siyaasaddan. (Ujeedooyinka siyaasaddan, hawlwadeenada degmo dugsiyeedka waxa kamid ah xubnaha guddida dugsiga, shaqaalaha dugsiga, wakiilada, isdirayaasha, qandaraaslayaasha, ama dad kale ee qaybta ka ah kormeerista iyo maamulka degmada.)

C. Xadgudubka siyaasaddan wuxuu yimaadda marka arday, macallin, maamule, ama hawlwadeen kale oo degmo dugsiyeedka ka tirsan uu gaysto, ku hanjabo inuu gaysanayo, ama isku dayo inuu xadgudub gaadhsiiyo arday, macallin, maamule, ama hawlwadeen kale oo degmo dugsiyeedka ka tirsan oo kusalaysan qowmiyadda, midabka, caqiidada, diinta, jinsiyada asalka ah, jinsiga, da'da, xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada qofka.

D. Degmo dugsiyeedku waxay ku dhaqaaqi baadhitaan dhammaan cabashooyinka, ha noqdaan qaar rasmi ah ama aan rasmi ahayn, ha noqdaan hadal ama qoraal, ee takoor, dhibaatayn, ama xadgudub kusalaysan qowmiyadda, midabka, caqiidada, diinta, jinsiyada asalka ah, jinsiga, da'da, xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada qofka, iyo inay edbiso ama ka qaaddo tallaabo ku habboon ardayga, macallinka, maamulaha,

ama hawlwadeenka degmo dugsiyeedka ee lagu helo inuu ku xadgudbay siyaasaddan.

III. QEEXITAANNO

A. "Weeraristu" waa:

1. tallaabo la qaado iyadoo loo dan leeyahay in lagu cabsigaliyo qof kale in la bado waxyeelo jidheed ama dhimasho;

2. Dhibaato gaadhsiin ku talogal ah ama isku day in la gaadhsiiyo qof kale waxyeelo jidheed; ama

3. Hanjabaadda in waxyeelo jidheed la gaadhsiiyo qof kale iyadoo awood loo leeyahay in waxa lagu hanjabay la samayn karo.

B. "Dhibaataynta" ay siyaasaddan mamnuucday waxay ka kooban tahay wax muuqda ama hadal ah, oo ay kujiraan, laakiin aan ku ekayn, isgaadhsiinta elektarooniga, oo la xidhiidha qowmiyadda, midabka, caqiidada, diinta, jinsiyada asalka ah, jinsiga, da'da, xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada qofka ama kooxda marka habdhaqanku:

1. wuxuu leeyahay ujeedada ama saamaynta abuurista cabsigalin, cadaawad, ama dambi bey'adda shaqo ama tacliineed.

2. wuxuu leeyahay ujeedada ama saamaynta uu si wayn ama aan caqligal ahayn u farogalinayo shaqada iyo tacliinta qofka; ama

3. haddii kale si taban u saamaynayo fursadaha shaqaalaynta ama tacliineed ee qofka.

Sida lagu isticmaalay habraacyadan, erayga "dhibaatayn" waxa kujira isticmaalka aflagaado (sifooyinka midab ama sinji takoor), cabsigalin, iyo hanjabaado, taabasho aan la rabin iyo/ama xadgudub jidheed, iyo aflagaado iyo sawirrada feegaar, sawirro ama sawir-gacmeedyo, qoraalo, iimeylo, qoraalo la soo dhigo internetka iyo baraha xidhiidhka bulshada iyo/ama farriimaha taleefanka.

C. "Isla markaaba" waxay ka dhigan tahay sida ugu dhakhsaha badan laakiin aan ka badnayn 48 saacadood.

D. <u>Kala-soocyada Dhawrsan; Qeexdimo</u>

1. "Naafada" waxay ka ka dhigan tahay xaalad ama sifo kasta oo qofka geyeysiisa naafonimo. Qofka naafada ah waa qof kasta oo:

a. leh dhantaalni jidheed, dareenwad, ama maskaxeed taasi oo si muuqata u xaddidda mid ama kabadan hawlaha nolosha u muhiimka ah;

b. leh diiwaan dhantaalnidan; ama

c. loo arko inuu leeyahay dhantaalni.

2. “Xaaladda qoys” waxay ka dhigan tahay xaaladda hal ilme ama kabadan lala nool yahay:

a. waalidkooda ama waalidiintooda ama wakiilkooda sharciga ah; ama

b. wakiilka waalidka ama waalidiinta ama wakiilka oo haysta ruqsadda qoran ee waalidka ama waalidiinta ama wakiilka. Dhawritaanka ka dhanka ah dhibaataynta kusalaysan xaaladda qoys waxay khusaysaa qof kasta oo uur leh ama kujira hawsha xaasilinta hayn sharci ah ee qof da’da qaangaadhka aan gaadhin.

3. “Xaaladda guurka” waxay ka dhigan tahay in qofku yahay doob/gashaanti, xaaslay, guursi labaad, la furay, kala-tageen, ama lammaanaha nool iyo, kiisaska shaqaalaynta, oo ay kujirto ka dhawritaanka dhibaataynta kusalaysan aqoonsiga, xaaladda, ficillada, ama diinta lammaane ama lammaane hore.

4. “Jinsiyada asalka ah” waxay ka dhigan tahay meesha dhalashada ee qof ama meesha qofku ku abtirsado.

5. “Jinsiga” waxa kujira, laakiin aan ku ekayn, uurka, dhalmada, iyo naafooyinka la xidhiidha uurka ama dhalmada.

6. “Doorashada galmo” waxay ka dhigan tahay yeelashada ama dareemista in qofku leeyahay rabitaan niyadeed, jidheed, ama jinsi oo ku aaddan qof kale iyada oonu eegayn nooca jinsiga qofkaas ama yeelashada ama dareemista inuu qofku ku jihaysan yahay rabitaankan, ama yeelashada ama dareemista in qofku leeyahay sawir uu iska aaminsan yahay ama aqoonsi oo aan caadi ahaan la xidhiidhin lab ahaanshaha ama dheddig ahaansha bayoolajiyeed ee qofka. “Doorashada galmo” kuma jirto rabitaanka jidheed ama jinsi ee ku aaddan carruurta taasi ka imanaysa qof wayn.

7. Xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha” waxay ka dhigan tahay xaaladda ahaanshaha qof hela kaalmada fadaraal, gobol, ama deegaan, oo ay kujirto kaalmada caafimaad, ama ahaanshaha kirayste hela kababka fadaraal, gobol, ama deegaan, oo ay kujirto kaalmada kirada ama kababka kirada.

E. “Jawaab ka bixin” waxay ka dhigan tahay tallaabo lagu joojinayo laguna saxayo ficillada dhibaataynta ama xadgudubka, kahortagga ficillada dhibaataynta ama xadgudubka inayna soo noqon, iyo dhawrista, taageerista, iyo farogalinta iyada oo laga wakiil yahay ardayga bartilmaameedka ah ama ah dhibbanaha ficillada dhibaataynta ama xadgudubka.

F. Dhibaataynta Jinsi; Qeexdimo

1. Dhibaataynta jinsi waxay ka kooban tahay ku tallaabsiyo jinsi oo aan la rabin, codsiyo doonitaano jinsi, habdhaqan jidheed oo jinsi riixayo (wado) ama habdhaqan kale oo hadal ama jidheed ama isgaadhsiin nooc ahaan ah jinsi marka:

   a. isku dhiibista habdhaqankaas ama wada-xidhiidhkaas lagu xidho xaalad, si cad ama dadban, helitaan shaqaalayn ama waxbarasho; ama

   b. isku dhiibista ama diidista habdhaqankaas ama wada-xidhiidhkaas ee qof loo isticmaalo arrin khusaysa go'aanada saamaynaya shaqaalaynta ama waxbarashada qofkaas; ama

   c. habdhaqankaas ama wada-xidhiidhkaas uu leeyahay ujeedada ama saamaynta si aad ah ama aan caqligal ahayn u farogalinaya shaqaalaynta ama waxbarashada qofka, ama abuuraya bey'ad cabsigalin, cadaawad, ama shaqaalayn ama waxbarasho.

2. Dhibaataynta jinsi waxa kujiri kara, laakiin aan ku ekayn:

   a. ku dhibaatayn hadal ama gabboodfal;

   b. cadaadis ku saaris dhinaca hawlaha jinsi;

   c. daaris, qanjiidhin, ama taabasho jidheed oo aan la rabin, jinsina riixayo, reebista aan daruuriga ahayn ee ardayga ee macallimiinta, maamulayaasha, ama hawlwadeenada kale ee degmada si looga dheeraato waxyeelo jidheed oo ku timaad qofka ama hantida;

   d. habdhaqanka ama erayada jinsi ee aan la rabin, oo ay kujirto rabitaan jinsi, oo ay la socoto hanjabaad maldahan ama cad oo la xidhiidha xaaladda shaqaalaynta ama waxbarasho ee qofka;

   e. habdhaqanka ama erayada jinsi ee aan la rabin, oo ay kujirto rabitaan jinsi, oo ay la socoto ballanqaadyo maldahan ama cad ee si gaar u eegis marka la eego xaaladda shaqaalayn ama waxbarasho ee qofka; ama

   f. habdhaqan ama erayo aan la rabin oo ku aaddan qof jinsiga uu yahay dartii.

G. Xadgudubka Jinsi; Qeexdimo

1. Xadgudubka jinsi waa daandaansi ama qasab ama hanjabaadda ku lugta

leh taabashada qaybaha qarsoon ee qof kale, ama ku qasbid qof inuu taabto qaybaha qarsoon ee qof kale. Qaybaha qarsoon, sida lagu qeexay Minn. Stat. § 609.341, waxa kujira cawrada, gumaarka, bawdada hore, badhyaha, ama naasaha, iyo sidoo kale marada qarinaysa meelahan.

2. Xadgudubka jinsi waxa kujiri kaa, laakiin aan ku ekayn:

a. taabashada, daarista, qabashada, ama qanjiidhinta qaybaha qarsoon ee ee qof kale, qofkaasi ha noqdo isla jinsiga ama jinsiga ka soo horjeeda;

b. ku tirtirsiin, ku qasbid, ama isku dayid ku qasbid taabashada qaybaha qarsoon ee qof kale;

c. ku tirtirsiin, ku qasbid, ama isku dayid ku qasbid u galmood ama ficil jinsi qof kale; ama

d. ugu hanjabid ku qasbid ficillo jinsi, oo ay kujiraan taabashada qaybaha qarsoon ama u galmood, qof kale.

H. <u>Xadgudubka; Qeexdin</u>

Xadgudubka siyaasaddan mamnuucday waa daandaan dagaal ama weerar qof ama koox kale kaasi oo sababtiisu tahay, ama si ula xidhiidha, qowmiyad, midab, caqiido, diin, jinsiyada asalka ah, jinsi, da', xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada.

IV. HABRAACYADA SHEEGISTA

A. Cid kasta oo rumaysan inuu ahaa bartilmaameedka ama dhibbanaha takoor, dhibaatayn ama xadgudub kusalaysan qowmiyad, midab, caqiido, diin, jinsiyada asalka ah, jinsi, da', xaaladda guur, xaaladda qoys, xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, doorashada galmada, ama naafada oo uu ku kacay arday, macallin, maamule, ama hawlwadeen kale oo degmo dugsiyeedka ka tirsan, ama cid kale oo og ama rumaysan habdhaqan keeni kara dhibaataynta ama xadgudubka siyaasaddan mamnuucday oo ku aaddan arday, macallin, maamule, ama hawlwadeen kale oo degmo dugsiyeedka ka tirsan ama koox arday ah, macallimiin ah, maamulayaal ah, ama hawlwadeenada ee kale degmo dugsiyeedka ka tirsan waa inay u sheegaan ficillada la sheegayo saraakiisha degmo dugsiyeedka ee u xilsaaran isla markaaba. Qofku waxa dhici karta inuu sheego habdhaqan keeni kara takoor, dhibaatayn ama xadgudub isagoon la aqoonsan. Hase yeeshee, degmo dugsiyeedku waxa dhici karta inayna kaliya isku hallayn warbixinta bilaa aqoonsiga ah si ay u go'aamiso edbin ama jawaabaha kale xalka ah.

B. Degmo dugsiyeedku waxay dhiirigalisaa in dhinaca wax sheegayaa ama dacwooduhu uu isticmaalo foomka warbixinta oo laga heli karo maamulaha ama horjoobaha dhismaha ee dhisme kasta ama laga heli karo xafiiska degmo dugsiyeedka, laakiin warbixinaha afka ah waa in iyagana loo tixgaliyo cabashooyin ahaan sidoo kale.

C. Ma jiraan wax kamid ah siyaasaddan oo qofka u diidaya inuu toos ugu sheego dhibaataynta ama xadgudubka sarkaalka xuquuqda aadanaha degmo dugsiyeedka ama kormeeraha guud. Haddii cabashadu ku lug leedahay qaadaha warbixinta dhismaha, cabashada waa in loo gudbiyo ama laga fayl garaysto si toos ah kormeeraha guud ama sarkaalka xuquuqda aadanaha degmo dugsiyeedka.

D. Dugsi Kasta Dhexdiisa. Maamulaha dhismaha, wakiilka maamulaha, ama horjoogaha dhismaha (halkan kadib ah "qaadaha warbixinta dhismaha") waa qofka qaabilsan qabashada warbixinaha hadalka ah ama qoran ee dhibaataynta ama xadgudubka ay siyaasaddan ka mamnuucday heerka dhismeed. Hawlwadeen degmo dugsiyeed oo kasta oo muddakar ah oo hela warbixin dhibaataynta ama xadgudubka ay siyaasaddan mamnuucday waa in isla markaaba u sheego qaadaha warbixinta dhismaha. Haddii cabashadu ku lug leedahay qaadaha warbixinta dhismaha, cabashada waa in toos loogu gudbiyo kormeeraha guud ama sarkaalka xuquuqda aadanaha degmo dugsiyeedka. Qaadaha warbixinta dhismuhu waa inuu hubiyo in siyaasaddan, iyo habraacyadeeda, ku-camalfalladeeda, cawaaqiibteeda, iyo ciqaabaheega si caddaalad ah oo buuxda loo fuliyey waana inuu u taagnaado cidda u horraysa ee lagala xidhiidhayo arrimaha siyaasadda iyo habraaceed.

E. Macallinka, maamulaha dugsiga, isdiraha, qandaraalaha, ama shaqaalaha kale ee dugsigu waa inay si gaar ah ugu baraarugsanaadaan xaaladhaa, duruufaha, ama dhacdooyinka suurogalka ah ee ay kamid noqon karaan ficillada dhibaataynta ama xadgudubka. Qof kasta oo kuwan oo u taagnaada, arka, ama hela warbixin, ama leh ogaansho ama rumaysnaan kale ee habdhaqan ay dhici karto inuu keeno dhibaatayn ama xadgudub waa inuu sameeyaa dedaal macquul ah si uu wax uga qabto una xalliyo dhibaataynta ama xadgudubka waana inuu ku wargeliyo qaadaha warbixinta dhismaha isla markaaba. Hawlwadeen degmo dugsiyeedka ee ku hoobta inuu ku wargeliyo qaadaha warbixinta dhismaha habdhaqan ay dhici karto inuu keeno dhibaatayn ama xadgudub amase ku hoobta inuu sameeyo dedaal macquul ah si uu wax uga qabto una xalliyo dhibaataynta ama xadgudubka wakhtiga ku habboon waxa laga qaadi karaa tallaabo edbin ah.

F. **Marka la helo warbixin la xidhiidha habdhaqan qof muddakar ah,** qaadaha warbixinta dhismuhu waa inuu ogaysiiyo Sarkaalka Xuquuqda Aadanaha Degmo Dugsiyeedka, isagoon baadhin warbixinta, isagoona isticmaalaya Foomka Warbixinta Dhibaataynta iyo Xadgudubka. Qaadaha warbixinta dhismuhu waa codsan karaa, laakiin kuma adkaysan karo, cabasho qoran. Foomka Warbixinta Dhibaataynta iyo Xadgudubka ayuu u gudbin doonaa qaadaha warbixinta dhismuhu Sarkaalka Xuquuqda Aadanaha shan (5) maalmood gudahood qabashada warbixinta.

Marka uu helo warbixinta la xidhiidha habdhaqanka ardayga, qaadaha warbixinta dhismuhu wuxuu galin warbixinta nidaamka tabinta edbinta ardayga shan (5) maalmood gudahood helitaanka warbixinta. Qaadaha warbixinta dhismuhu waa inuu hubiyo in siyaasaddan iyo habraacyadeeda la raacay, in warbixinta loo qiimeeyey, baadhay oo loo maareeyey si waafaqsan xeerka anshaxa degmada iyo hababka edbinta dugsiga, iyo in cawaaqiibta, ciqaabaha, iyo jawaabaha xalka ah si caddaalad ah oo buuxda loo fuliyey. Qaadaha warbixinta dhismuhu waa inuu u taagnaado cidda u horraysa ee lala xidhiidhayo marka la

eego ardayda iyo qoysaska ee siyaasadaha, habraacyada iyo arrimaha edbinta dugsiga ee la xidhiidha cabashooyinka habdhaqanka ardayga.

Ku hoobashada gudbinta wixii warbixin dhibaatayn ama xadgudub ah ama cabasho sida halkan ku cad, ama inuu ka jawaabo warbixin ama cabasho waafaqsan siyaasadaha degmo dugsiyeedka, xeerka anshaxa iyo/ama siyaasadaha iyo habraacyada edbinta, waxay keeni kartaa tallaabo edbin in laga qaado qaadaha warbixinta dugsiga.

G. Degmada Dhexdeeda. Guddida dugsigu waxay u xilsaartay Agaasimaha Guud ee Khayraadka Dadka iyo Xidhiidhada Xoogsata inuu ahaado sarkaalka xuquuqda aadanaha degmo dugsiyeedka si loo qabto warbixinaha ama cabashooyinka dhibaataynta ama xadgudubka ee ay siyaasaddan mamnuucday. Haddii cabashadu ku lug leedahay sarkaalka xuquuqda aadanaha, cabashada waa in toos loogu gudbiyo kormeeraha guud.

H. Degmo dugsiyeedku waa inay si cad u sheegto magca sarkaalka xuquuqda aadanaha, oo ay kujiraan cinwaanada waraaqaha iyo lambarrada taleefanada.

I. Gudbinta cabasho ama warbixin dhibaatayn ama xadgudub oo daacad ah oo ay mamnuucday siyaasaddani saamayn mayso shaqaalaynta, darajooyinka, layliyada, ama bey'adda waxbarasho ama shaqo ee dacwoodaha ama tabiyaha.

J. Isticmaalka foomamka sheegista ee rasmiga ah ma aha waajib.

K. Warbixinaha dhibaataynta ama xadgudubka ee ay mamnuucday siyaasaddani waxa loo kala saaraa mid ah xogta gaarka ah ee waxbarasho iyo/ama shakhsi iyo/ama xogta baadhiseed ee qarsoodiga ah, dhicina mayso in la shaaciyo iyadoon sharcigu oggolayn.

L. Degmo dugsiyeedku waxay ixtiraami asturnaanta dacwoodaha, qofka si aanu u ogaan qofka cabashada laga gudbiyey, iyo maragyada intii suurogal ah, si waafaqsan waajibaadyada sharci ee degmo dugsiyeedka si loo baadho, loo qaado tallaabo habboon, looguna dhaqmo wixii waajibaad muujin ama shaacin ah.

M. Ka aargosiga dhibbaha, tabiyaha daacadda ah, ama maragga xadgudubka ama dhibaatayn waa mamnuuc.

N. Eedaynaha ama warbixinaha beenta ah ee xadgudub ama dhibaatayn ee ka dhan ah qof kale waa mamnuuc.

O. Qofka ku kaca ficil xadgudub ama dhibaatayn, aargoosi, ama tabin been ah ee xadgudub ama dhibaatayn, ama fasaxa, saamaxa, ama u dulqaata xadgudub ama dhibaatayn waa in la edbiyo ama laga qaado jawaabo kale oo xal ah waxa uu sameeyey dartii iyadoo la raacayo siyaasadaha iyo habraacyada degmo dugsiyeedka.

Cawaaqiibta loogu talogalay ardayda gala, kaqayb ah, ficillo mamnuuc ah ee xadgudub ama dhibaatayn ama ku kaca aargoosi ama been sheegid ulakac ah

waxay u dhaxayn karaan jawaabo xal ah ama wax-ka-qabadyo habdhaqan oo togan ilaa hakin iyo/ama eryid.

Cawaaqiibta shaqaalaha fasaxa, saamaxa, ama u dulqaata xadgudub ama dhibaatayn ama ku kaca aargoosi ama been sheegid ulakac ah ee xadgudub ama dhibaatayn waxay keeni kartaa tallaabo edbin ilaa ka eryid shaqada.

Cawaaqiibta dadka kale ee ku kacaya ficillo mamnuuc ah ee xadgudub ama dhibaatayn waxa kujiri kara, laakiin aan ku ekayn, ka eryidda degmo dugsiyeedka iyo dhacdooyinka degmo dugsiyeedka iyo/ama ka joojinta adeegyada iyo/ama heshiisyada.

V. BAADHITAANKA

A. Maamulka degmo dugsiyeedka, sarkaalka xuquuqda aadanaha, saddex (3) maalmood gudahood helitaanka warbixinta ama cabashada sheegaysa takoorka, dhibaataynta ama xadgudubka ay siyaasaddani mamnuucday, waa inay bilaabaan ama oggolaadaan baadhitaan. Baadhitaanka waxa samayn kara saraakiisha degmo dugsiyeedka ama cid saddexaad oo ka wakiil ah degmo dugsiyeedka. Cabashooyinka kusaabsan habdhaqanka ardayga waxa caadi ahaan baadha qaadaha warbixinta dhismaha isagoo raacaya xeerka anshaxa iyo habraacyada edbinta ee dugsiga. Dhammaan caddayaha ardayga ku kaca xadgudub siyaasadda waxa lagu hayn nidaamka tabinta edbinta dugsiga. Baadhitaanka habdhaqan qofka muddakarka ah waxa lagu maarayn karaa heerka dhismeed ama heerka degmeed iyada oo ku xidhan duruufaha cabashada, waxaana lagu xadifi warbixin qoran ama Foomka Ficilka Maamuleed ee Dhibaataynta Takoorta waxaana hayn Sarkaalka Xuquuqda Aadanaha.

B. Baadhitaanku wuxuu ka koobnaan karaa waraysi shakhsi ah oo lala yeesho dacwoodaha, qofka cabashada laga gudbiyey, iyo kuwa kale ee laga yaabo inay og yihiin dhacdada ama duruufaha la sheegayo ee keenay cabashada jirta. Baadhitaanku sidoo kale wuxuu ka koobnaan karaa habab kale oo kasta iyo dokumentiyada baadhuhu u haysto inay la xidhiidhaan.

C. Go’aaminta in habdhaqanka la sheegayo keenayo ku xadgudubka siyaasaddan, degmo dugsiyeedku waa inay tixgaliso duruufaha ku xeeran, nooca habdhaqan, dhacdooyinkii tagay ama habdhaqanka tagay ama kan taagan, xidhiidhada ka dhexeeya dhinacyada ku lugta leh, iyo xaaladda dhacdooyinka la sheegayo ku dhaceen. Haddii ficil ama dhacdo gaar ah keenayso ku xadgudub siyaasaddan waxay u baahan tahay go’aamin kusalaysan dhammaan xaqiiqooyinka ku gadaaman duruufaha.

D. Sidoo kale, degmo dugsiyeedku waxay qaadi kartaa tallaabooyin degdeg ah, marka ay doonto, si ay u ilaaliso bartilmaameedka ama dhibbaha, dacwoodaha, iyo ardayda, macallimiinta, maamulayaasha, iyo hawlwadeenada kale ee degmo dugsiyeedka ee ku maqan dhammaystirka baadhitaanka dhibaatayn ama xadgudubka la sheegay ee siyaasaddan mamnuucday.

E. Dambiilaha lagu sheegayo gaysashada dhibaataynta ama xadgudubka waa in loo oggolaado fursadda inuu is-difaaco inta baadhitaanku socdo ama kahor inta aan edbinta ama jawaabaha kale ee xalka ah lagu qaadin.

F. Baadhitaanka waxa loo dhammaystiri sida ugu dhakhsaha badan. Sarkaalka xuquuqda aadanaha ee dugsigu waa inuu u diro warbixin qoran kormeeraha guud marka la dhammaystiro baadhitaanka. Haddii cabashadu ku lug leedahay kormeeraha guud, warbixinta waxa toos loogu gudbin karaa guddida dugsiga. Warbixinta waa inay kujiraan go'aaminta haddii eedaymaha la xaqiijiyey runnimadooda iyo haddii ay u muuqdaan inay yihiin xadgudubyo lagu sameeyey siyaasaddan.

VI. TALLABADA DEGMO DUGSIYEEDKA

A. Marka la dhammaystiro baadhitaan kaasi oo lagu go'aamiyey in xadgudub siyaasaddan dhacay, degmo dugsiyeedku waxay qaadi tallaabo ku habboon. Tallaabadan waxa kujiri kara, laakiin aan ku ekayn, digniin, hakin, eryid, beddelid, dhaqancelin, shaqo ka eryid, ama shaqo ka fadhiisin. Cawaaqiibta edbintu waxay noqon doonaan qaar ku filan inay joojiyaan xadgudubyada iyo inay si ku habboon u edbiyaan habdhaqanka la mamnuucay. Jawaabaha xalka ah ee dhibaataynta ama xadgudubka waa inay ku habboon yihiin dhacdada iyo nooca habdhaqanka. Tallaabada degmo dugsiyeedka ee loo qaado xadgudubka siyaasaddan waxay noqon mid waafaqsan shuruudaha heshiisyada gorgortanka wada-jira ee khuseeya, sharciga fadaraalka Minnesota, iyo siyaasadaha iyo qawaaniinta degmo dugsiyeedka ee khuseeya.

B. Degmo dugsiyeedka looma oggola inay tusto dhibbane xogta gaarka ah ee waxbarasho ama hawlwadeen ee la xidhiidha dambiilaha kaasi oo ah arday ama shaqaale ka tirsan degmo dugsiyeedka. Saraakiisha dugsigu waxay ogaysiin doonaan waalidka ama wakiilka bartilmaameedyada ama dhibbanayaasha dhibaataynta ama xadgudubka iyo waalidka ama wakiilka dambiilayaasha dhibaataynta ama xadgudubka kaasi oo ku lug lahaa dhibaatayn ama xadgudub la sheegay lana xaqiijiyey tallaabada xalka ama edbinta ah ee la qaadayo, ilaa xadka uu sharcigu oggol yahay.

C. Si looga hortago ama looga jawaabo tallaabooyinka dhibaataynta ama xadgudubka uu galay ama lagu eedeeyey ilme naafo ah, degmo dugsiyeedku waa inay, halka uu go'aamiyey inay ku habboon tahay barnaamijka waxbarashada la khaasyeelay ee ilmaha ama kooxda Qaybta 504, oggolalataa IEP-ga ilmaha ama qorshaha Qaybta 504 in la qoro si wax looga qabto xirfadaha iyo ku-fiicnaanta ilmuhu u baahan yahay naafada uu yahay ilmuhu darteed si loogu oggolaado ilmaha inuu ka jawaabo ama aanu kaqaybgalin tallaabooyinka dhibaataynta ama xadgudubka.

VII. AARGOOSI AMA AARGUDASHO

Degmo dugsiyeedku waxay edbin ama ka qaadi tallaabo ku habboon ardayga, macallinka, maamulaha, ama hawlwadeenka kale ee degmo dugsiyeedka ee ku kaca tallaabo aargoosi ama ka aargoosta cidda caddaysta, sheegta, ama samaysto sheegis daacad ah dhibaataynta ama xadgudubka la sheegayo ee ay siyaasaddan mamnuucday,

kaasi oo maragfura, kaalmeeya, ama kaqaybqaata baadhitaan aargoosi ama dhibaataynta ama xadgudubka la sheegayo, ama kaasi oo ka maragfura, kaalmeeya, ama kaqaybqaata dhacwad ama dhagaysi la xidhiidha dhibaataynta ama xadgudubkan. Aargoosiga waxa kujira, laakiin aan ku ekayn, nooc kasta oo cabsigalin, dhibaatayn, ama la dhaqan gaar ah oo ulakac ah. Cawaaqiibta edbintu waxay noqon qaar ku filan inay joojiyaan xadgudubyada iyo inay si ku habboon u edbiyaan cidda ku kacday dhibaataynta ama xadgudubka. Jawaabaha xalka ah ee dhibaataynta ama xadgudubka waa inay yihiin qaar ku habboon dhacada iyo nooca habdhaqanka.

VIII. XAQA U LAHAANSHAHA HABRAACYO CABASHO OO BADIIL AH

Habraacyadan ma diidaan xaqa qofku u leeyahay inuu raaco ikhtiyaaro kale kuwaasi oo ay kujiri karaan u gudbinta eedaymo Waaxda Minnesota ee Xuquuqda Aadanaha, bilaabista tallaabo madani, ama raadinta magdhaw sida ay dhigayaan shuruucda dambiilaha iyo/ama sharciga fadaraalku.

IX. DHIBAATAYNTA AMA XADGUDUBKA GABBOODFAL AHAAN

A. Marka la eego duruufaha qaar, dhibaataynta ama xadgudubka la sheegay wuxuu sidoo kale noqon karaa gabboodfal sida uu dhigayo sharciga Minnesota. Haddii ay sidaas tahay, hawlaha tabin waajib ah sida uu dhigayo xeerka Minn. Stat. § 626.556 ayaa khusayn kara.

B. Ma jiro siyaasaddan wax ka mamnuucayaa degmo dugsiyeedku inay qaaddo tallaabo degdeg ah si ay u ilaaliso dhibbanayaasha dhibaataynta, xadgudubka, ama gabboodfal la sheegayo.

X. BAAHINTA SIYAASADDAN IYO TABOBAR

A. Siyaasaddan waa in si cad loogu dhejiyo gabi ahaan dhismaha dugsi kasta meelaha ay gaadhi karaan ardayda iyo xubnaha shaqaaluhu.

B. Siyaasaddan waa in la siiyo shaqaale kasa oo degmo dugsiyeedka ka tirsan iyo qandaraaslaha madaxabannaan kaasi oo si joogto ah ula macaamila ardayda wakhtiga ka shaqaalaysiinta hore ee degmo dugsiyeedka.

C. Siyaasaddan waa inay ka muuqataa buug-gacmeedka ardayga.

D. Degmadu waxay soo saari hab loogala xaajoonayo siyaasaddan ardayda iyo shaqaalaha.

E. Degmo dugsiyeedku waxay fulin kartaa barnaamijyo kahortag xadgudub iyo waxbarasho kobcinta dabeecadda si looga hortago loona yareeyo xadgudubyada lagu sameeyo siyaasadda. Barnaamijyada noocan ah waxay bixin karaan baris waxbarashada dabeecadda oo ay kujiraan, laakiin ku ekayn, tayooyinka dabeecadda sida dhug-yeelashada, runnimada, ixtiraamka maamulka, hawlkarnimada, mahadcelinta, is-edbinta, samirka, saamaxaadda, ixtiraamka dadka kale, nabadgalinta, iyo dhibaato xallinta.

F. Siyaasaddan waa in dib loo eego ugu yaraan sannadkiiba mar si loo waafajiyo sharciga gobolka iyo fadaraalka.

Tixraacyada Sharci: Minn. Stat. § 120B.232 (Waxbarashada Kobcinta Dabeecadda)
Minn. Stat. § 121A.03, Subd. 2 (Siyaasadda Dhibaataynta iyo Xadgudubka jinsiga, Diinta, iyo Qowmiyadda)
Minn. Stat. § 121A.031 (Siyaasadda Xoogsheegadka Ardayga ee Dugsiga)
Minn. Stat. Ch. 363A (Xeerka Xuquuqda Aadanah Minnesota)
Minn. Stat. § 609.341 (Qeexdimo)
Minn. Stat. § 626.556 *et seq.* (Tabinta si Xun ula Dhaqanka Carruurta)
20 U.S.C. §§ 1681-1688 (Title IX ee Wax-ka-beddelka Waxbarashada ee 1972)
29 U.S.C. § 621 *et seq.* (Xeerka Takoorka Da'da ee Shaqaalaynta)
29 U.S.C. § 794 (Xeerka Dhaqancelinta ee 1973, § 504)
42 U.S.C. § 1983 (Tallaabada Madaniga ee ka Qaadista Xuquuqda)
42 U.S.C. § 2000d *et seq.* (Title VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964)
42 U.S.C. § 2000e *et seq.* (Title VII ee Xeerka Xuquuqda Madaniga)
42 U.S.C. § 12101 *et seq.* (Xeerka Ameerikaanka Naafada ah)

Tixraacyada Tilmaame: Siyaasadda Guddida 102 (U-sinnaanta Fursadda Waxbarasho)
Siyaasadda Guddida 401 (U-sinnaanta Fursadda Shaqaalayn)
Siyaasadda Guddida 402 (Siyaasadda Takoor La'aanta Naafada)
Siyaasadda Guddida 403 (Edbinta, hakinta, iyo caydhinta Shaqaalaha Degmo Dugsiyeedka)
Siyaasadda Guddida 406 (Xogta Dadwaynaha iyo Gaarka ee Hawlwadeenada)
Siyaasadda Guddida 414 (Tabinta la Oggolaaday ee Dayaca Ilmaha ama Gabboodfal Jidheed ama Jinsi)
Siyaasadda Guddida 415 (Tabinta la Oggolaaday ee si Xun ula Dhaqanka Muddakarka Nugul)
Siyaasadda Guddida 506 (Edbinta Ardayda)
Siyaasadda Guddida 514 (Siyaasadda Mamnuucidda Xoogsheegadka)
Siyaasadda Guddida 515 (Ilaalinta iyo Asturnaanta Diiwaanada Ardayda)
Siyaasadda Guddida 521 (Takoor La'aanta Naafada Ardayda)
Siyaasadda Guddida 522 (Takoor La'aanta Jinsiga Ardayga)
Siyaasadda Guddida 524 (Siyaasadda Isticmaalka la Aqbali karo iyo Badbaadada ee Internetka)
Siyaasadda Guddida 525 (Kahortagga Xadgudubka)
Siyaasadda Guddida 526 (Mamnuucidda Kadeedista)
Siyaasadda Guddida 528 (Takoor La'aanta Ardayga ee Xaaladda Waalid, Qoys, iyo Guur)

SIYAASADDA GUDDIGA 413
St. Cloud Area School District 742
St. Cloud, Minnesota

La Hirgaliyey: Abriil 26, 2001
Dib Loo Eegay: Ogosto 10, 2005
Dib Loo Eegay: Abriil 28, 2011
Dib Loo Eegay: Noofambar 9, 2016 (horay Siyaasadda Guddida 105 iyo Habraacyada Maamuleed 105A)

St. Cloud Area School District 742

Foomka Warbixinta Takoorka, Dhibaataynta iyo Xoogsheegadka

St. Cloud Area Schools waxa ka go'an abuurista jawi badbaado iyo daryeel iyo dhaqan loogu talogalay dhammaan ardayda iyo shaqaalaha. Degmadu waxay joogtaysaa siyaasad sugan mamnuucista dhammaan qaababka takoorka, dhibaataynta, xadgudubka iyo xoogsheegadka.

Dhibaataynta ka dhanka ah ardayda ama shaqaalaha ee ku salaysan xaaladda koox ee la ilaalyey waa qaab takoor ah. Dhibaataynta uu gaysto qof, lab ama dheddig, arday ama xubin shaqaale, oo kusalaysan qowmiyad, midab, caqiido, diin, jinisiyada asalka ah, jinsi (oo ay kujirto dhibaataynta kusalaysan aqoonsiga iyo muuqaalka jinsiga), doorashada galmada, da'da, xaaladda guur, xaaladda qoys, naafada, ama xaaladda la xidhiidha kaalmada dadwaynaha, xaaladda ahaansha askartii hore(veteran), taasi oo abuuraysa cabsi galin, bey'ad shaqo ama barasho oo cadaawad ama dambi, ama si muuqata u farogalisa bey'adda shaqo ama barasho, loo dulqaadan maayo marka la eego duruuf kasta. (Fiiri Siyaasadda Guddida 413).

Xoogsheegadku micnihiisu waa cabsigalin, hanjabaadda, habdhaqanka gabboodfal ama waxyeelayn taas oo si cad u ah dambi iyo halka ay jirto isla ekaansho la'aan u dhaxaysa tabarta ardayda ku lugta leh habdhaqanka, ama halka habdhaqanku si muuqata u farogaliyo bey'adda barasho ee ardayda ama helitaanka barnaamijyada iyo adeegyada dugsiga. (Fiiri Siyaasadda Guddida 514).

Haddii adiga ama cid aad garanayso ay dugsiga kala kulantay takoor, dhibaatayn, xadgudub ama xoogsheegad ama dhacdo dugsiga la xidhiidha sababta *ay doontoba* ha noqotee, waxaad ka samayn kartaa warbixin si ay Degmadu u baadho dhacdada. Ardayga, waalidka/wakiilka, ama shaqaalaha degmadu waxay buuxin karaan foomkan kuna soo celin karaan dhismaha maamulaha. Taas beddelkeeda, waxaad samayn kartaa warbixin hadal ama qoraal ah oo aad ku hagaajiso maamulaha dhismaha ama maamulaha barnaamijka. Shaqaalaha degmada ee qabta foom la soo buuxiyay ama warbixin kale oo qoran ama hadal ah wuxuu si degdeg ah u ogaysiinayaa maamulaha dugsiga, maamulaha barnaamijka ama Sarkaalka Xuquuqda Aadanaha Degmada, kaasi oo u xilsaari doona qofka inuu baadho oo xalliyo warbixinta ay tahay sida ay dhigayaan siyaasadaha Degmada iyo shuruucda fadaraalka iyo gobolku.

Degmadu shaacin mayso aqoonsiga qofka sameeya warbixin, marla laga reebo hawlwadeenka Degmada ee loo xilsaaray inuu baadho warbixinta ama marka uu sharcigu dhigayo sidaas. Ka aargoosiga qof sameeya warbixin ama kaqaybqaata ama kaalmeeya baadhitaan takoor ama dhibaatayn si adag ayaa loo mamnuucay.

Fadlan bixi macluumaadka ugu badan ee suurogal ah.
Fadlan ku darso xaashiyo dheeraad ah haddii ay daruuri noqoto.

1. Macluumaadkak Hordhaca: Taariikdha Warbixinta: _____

Magaca Qofka Samaynaya Warbixinta: _____

Lambarka Taleefanka: _____ Imeylka: _____

2. Waxaan ahay (mid sax):

☐Ardayga – Heerka Fasalka/Dugsiga:_____

☐Shaqaalaha – Mansabka/Goobta:_____

☐Waalidka/Wakiilka ☐Isdiraha ☐Cid Kale: _____

3. Warbixinta la siiyey: ☐Maamulaha/Kaaliyaha Maamulaha _____

☐Maamulaha Barnaamijka _____ ☐Sarkaalka Xuquuqda Aadanaha _____

☐Cid Kale _____

4. Macluumaadka Warbixinta: Taariikdha Dhacdada: _____

Fadlan bixi magacyada dhammaan dadka (oo adna aad kujirto haddii ay khusayso) ahaa bartilmaameedka takoorka, dhibaataynta ama xoogsheedka:

_____

_____

Fadlan bixi magaca iyo/ama sharraxaadda dhammaan shakhsiyaadka (ardayda, shaqaalaha dugsiga, booqdayaasha dugsiga ama cido kale) kuwaasi oo ku kacay ama kaqaybqaatay takoorka, dhibaataynta ama xoogsheedka la sheegay:

_____

_____

Halkee ayey dhacdadu ka dhacday: _____

Sharraxaadda dhacdada: _____

_____

_____

_____

Fadlan bixi magaca iyo/ama sharraxaadda dhammaan shakhsiyaadka (ardayda, shaqaalaha dugsiga, booqdayaasha dugsiga ama cido kale) kuwaasi oo markhaati ka ahaa takoorka, dhibaataynta ama xoogsheedka la sheegay:

_____

_____

Haddii aad rumaysan tahay dhacdadu inay kusalaysnayd xaaladdaada kooxeed ee la ilaaliyey ama xaaladda kooxeed ee lailaaliyey ee bartilmaameedka, fadlan ku muuji hoos kooxda la ilaaliyey ee salka u ahayd habdhaqanka la sheegay iyo sababta aad u rumaysan tahay inay taasi ahayd salka habdhaqanka:

☐Qoomiyad/Midab/Waddanka Qofku ka Soojeedo ☐Diinta/Caqiidada ☐Jinsiga/Doorashada Galmo ☐Naafonimada

☐Wax kale:_____

Sabab sheeg: _____

_____

Ma jirtaa macluumaad dheeraad ah oo kaalmayn kara qof baadhaya dhacdada (sida, Ma isku bas ayaad raacdeen? Ma isku fasal ayaad noqoteen?Ma leedahay xidhiidh ka baxsan dugsiga ama shaqada? Tani ma ku dhacdaa qof kale?

_____

_____

Macluumaad ama su'aalo dheeraad ah oo kusaabsan samaynta warbixin, la xidhiidh Sarkaalka Xuquuqda Aadanaha (320) 202-6819.

Maamulayaasha: Haddii warbixintan ku lug leedahay shaqaalaha dugsiga ama muddakar kale, fadlan degdeg u ogaysii Waaxda Khayraadka Aadanaha una gudbi nuqul warbixintan ah Agaasimaha Guud ee Khayraadka Aadanaha 5 maalmood gudahood.